**SHARCI L. 13 ee 1 Agosto 1966**
**Xeerka Biyaha**

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA

MARKUU Tixgeliyey ansaxidda Golaha Qaranka;

WUXUU SOO SAARAY

Sharciga soo socda;

**Cutubka 1aad**

Mabaadi'da Guud

**Qod. 1**

**Ujeedada Sharciga**

Isticmaalka biyaha guud iyo kuwa gaarahaaneyd ee dhulka Jamhuuriyadda waxay hoostagaan kormeerka Hay'adda awoodda u leh, si waafaqsan qodobka sharcigan.

**Qod. 2**

**Isticmaalka biyaha gaarka ah**

1. Dhammaan waxay xaq u leeyihiin inay u isticmaalaan shaqsi ahaan iyo guri ahaan biyaha harooyinka dabiiciga ah, webiyadda biyaha qulqula, laha biyo, ceelasha, biyahakeydka, berkedo, kanaale, iyo rakibaadda biyaha ee lahaanshaha guud, iyado la eegayo siduu qabo Qod. 4 ee sharcigaan.
2. Dhammaan xaq bay u leeyihiin inay ka waraabsadaan xoolahooda ilaha ku xusan faqrada la soo sheegay, haddii aysan wax u dhimeyn ama sababeyn calwin socodka biyaha isha biyaha, ceelka, keydka, farta, iyo qorarkiisa. Milkiilaha xoolaha waa inuu dhowraa nuxurka qodobka 4aad ee sharcigan, iyo inuu magdhawaa si kale wixii khasaarooyin ah ay geystaan xoolahiisa.
3. Qofna kama qaadan karto biyo ilaha, ceelasha, keydadka, waraha, faraha iyo berkedaha biyaha ee milkiyadda gaarka ah ruqsad la'aan milkiilaha, si waafaqsan qodobbada xeerka madaniga ee dhaqangalka ah.
4. Isticmaalka biyaha harooyinka, webiyada, biyaha qulqula, laha biyaha, ceelasha, berkedaha iyo faraha, iyo dhammaan goobaha biyo cabaalka soo jireenka ah, ee aan wax shaqa horumar ah laga qaban dhinaca Dowladda, laga reeba bixinta ujuurada isticmaalka eek u xusan Qod. 4 ee sharcigan.

**Qod. 3**

**Xuquuqda milkiilaha dhulka**

1. Milkiilaha dhulka xaq buu u leeyahay inuu ka faa'ideysto isticmaalka shaqsiga ee caadiga ah iyo guri, iyo waraabinta dhulkiisa iyo baahiyaha caadiga ee shirkadda, biyaha roobabka ama

daadad dabiici ah eek u qulqula dhulkiisa. Waa inuu si kastaba ku soo celiya socodkoodi dabiiciga ahaa biyaha dheeraadka ah.

2. Milkiilaha dhulka ee u isticmaalaaya biyaha si waafaqsan faqrada la soo sheegay waa inaysan wax yeeleyn dhulalka ku dheggen, aysan hoos u dhigin ama koobin xuquuqda ka jirtay biyaha ee maslaxadda milkiilayaasha isla dhulkaasi.

**Qod. 4**

**Xadka isticmaalka**

1. Qof kasta ee doonaayo isticmaalka biyaha si' joogta ah tiro ka sarreysa xadka lagu jaangooyey inta ugu sarreysa loo xeer hoosaad gaar ah si waafaqsan qod. 20 ee sharcigan, waa inuu ka haystaa fasax Rasmi ah ee isticmaalka Waaxda biyaha ee Wasaaradda Howlaha Guud , si waafaqsan shuruudaha u degsan,sida uu qabo qodobka Xeer hoosaadka la soo sheegay, marka la reebo in biyaha la isticmaalaayo ahayn milkiyad gaar ah ee isticmaalaha.
2. Qof kasta isticmaala mararka qaarkood ujeedadu tahay siin biyo ama isticmaal kale- biyo qadarkooda ka sarreeyo xadka ugu badan ee faqrada hore ku xusan, waa inuu bixiyaa, mar alle markuu qaadanaayo, wax u dhigma sida uu qabo qodobka xeer-hoosaadka la soo sheegay.
3. Si ku meel gaar ah, qof kasta si joogto ah u isticmaala qadar ka sarreeya xuduuda ugu badan eek u xusan faqrada kowaad waa inuu nidaamiyaa isticmaalkiisa qaabka hore loo dejiyey, muddo sannad dhaqangalka sharcigan.
4. Isticmaalka biyaha laga helay meelaha godan ee macmalka ah qoday Maamulka Guud waa lacag la'aan, marka laga reebo arrinta in lagu diyaariyey wax qabadka maamulka aasaaska.

**Qod. 5**

**Fasaxyo Gaar ah**

Waaxda biyaha ee wasaaradda Howlaha Guud way, danta guud awgeed, hoosgeeyo oggolaasho gaar ah isticmaalka biyaha ku sugan goobo gaar ah ama meelo, haba baxsanaato xadadka qodobka hore ku xusan.

**Qod. 6**

**Fasaxa wax qabad cusub**

1. Lama oggola wax qabad cusub ee miragoosashada, kazoo saarista, hagaajinta iyo isticmaalka biyaha, ku jirto ballaarinta ama dheereynta qodista ceelasha, waxaa la fulinaa fasax qoraal la'aan ee waaxda biyaha ee wasaaradda Howlaha Guud, looo oggolaaday siduu qabo qodobka Xeer-hoosaadka, ku xusan Qod. 2o ee sharcigaan.
2. Oggolaashada lama codsanaayo ceelasha, waraha, iyo dhamaan meelaha kale iyo waxqabadka habdhaqankii hore eee biyo cabaalka.

**Qod. 7**
**Diiwaanka Isticmaalooyinka**

1. Waaxda biyaha ee Wasaaradda Howlaha Guud waxay daryeeley kaydinta Diwaanka isticmaaleyaasha, si waafaqsan habka u degsan Xeer-hoosaadka ku xusan Qod. 20. Ee sharcigan.
2. Diiwaanka waxaa lagu tilmaama dabeecadda iyo ballaarinta xuquuqda isticmaalka la aqoonsanyahay ama la fasaxay si waafaqsan Qod. 4 iyo 5 ee sharcigan.
3. Waxa laga reebay diiwaangelinta ku xusan qodobkan dhammaan ceelasha, faraha iyo waxqabad kale biyo dhaqameed.

**Qod. 8**
**Dalladda isticmaaleyaasha**

1. Si loo sugo isticmaalka ugu wanaagsan ee biyaha, waaxda biyaha ee wasaaradda Howlaha Guud waxay kor u qaadi kartaa dhisidda dalladda isticmaaleyaasha.
2. Qaab dhismeedka dalladda isticmaaleyaasha waxaa lagu ooga xeer-hoosaadka ku xusan Qod. 20 ee sharcigan.

**Qod. 9**
**(Voltura) Fasaxa Isticmaalka**

1. Fasaxyada isticmaalka lama wareejin karo la’aan ruqsada oggolaashaha ee Hay’adda awooda u leh, si waafaqsan Xeer-hoosaadka ku xusan Qod. 20 ee sharcigaan.

**Qod. 10**
**Kala noqoshada fasaxa isticmaalka**

1. Fasaxyada isticmaalka way kala noqon kartaa waaxda biyaha ee wasaaradda Howlaha Guud:
   a) Hadda isticmaalaha uusan isticmaalin biyaha muddo hal sano ah;
   b) Haddii isticmaalaha ku kaca habdhaqan xun ama khasaarinaayo biyaha;
   c) Haddii, aragtida Hay’adda Caafimaadka, isticmaalka biyaha khatar gelinaayo faya dhowrka guud;
   d) Haddii isticmaalaha mid wax ka qaban Karin shuruudihii lagu aasaasay fasaxa isticmaalka;
   e) Haddii isticmaalahawareejiyo fasaxa isticmaalka amar la’aan waaxda biyaha;
   f) Haddii isticmaalaha bixin waayo ujuuraddii isticmaalka muddo 60 maalmood ka bilaabata taariikhda digniinta bixinta dhinaca Hay’adda awoodda u leh.
2. Amarka kala noqoshada fasaxa isticmaalka waa inuu sababaysanyahay ama la gaarsiiyey si qoraal ah isticmaalaha.

**Qod. 11**
**Xeer dhaqaale**

1. Xeer-hoosaadyada lagu soo saaray si waafaqsan Qod. 20 ee sharcigaan qeexayaan ujuuradda, canshuurta iyo waajibaadka kale isticmaalka biyaha, kirada kireystayaasha, siismada ruqsada

ama fasaxa, iyo mas'uuliyadda magdhowga khasashyada la xiriira shaqooyinka ay qabatay waaxda Biyaha iyo kormeerka ama tijaabinta shaqooyinka iyo rakibadda haydarooliga.

**Qod. 12**
**Dammaanada maamul cadaalad**

1. Qof kasta ee khasaare ka soo gaarto go'aan maamul ay qaaday waaxda Biyaha ee Wasaaradda Howlaha Guud wuu u qoran kara cabasho wasiirka muddo afar iyo shan maalmood laga billaabo taariikhda ogeysiinta.
2. Qof kasta ee khasaare ka soo gaarto aan maamul kama dambeys ah uu qaaday wasiirka howlaha guud wuxuu u qoran karaa cabasho Maxkamadda Sare, qaabka iyo muddada uu sharciga tilmaamaya.

**Cinwaanka 2aad**
Urur Maamul

**Qod. 13**
**Go'aan Wasiireed**

Dhammaan shaqooyinka la xiriira baaris, ilaalinta iyo qaybinta khayraadka biyaha waxaa awood u leh wasiirka Howlaha Guud, iyadoo sideeda tahay awoodda Ha'adda Caafimaadka wixii khuseeya daryeelka nadaafadda iyo fayadhowrka guud.

**Qod. 14**
**Guddiga Qaranka ee Biyaha**

1. Guddiga Qaranka ee Biyaha waa xubinta la tashiga ee wasaaradda Howlaha Guud .
2. Guddiga Qaranka ee Biyaha wuxuu ka kooban yahay
   a) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Howlaha Guud - Guddoomiye
   b) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Gudaha – Xubin
   c) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda – Xubin
   d) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha – Xubin
   e) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Caafimaadka iyo Shaqada – Xubin
   f) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Warshadaha iyo Ganacsiga – Xubin
   g) Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta Madaxa Waaxda Biyaha – Xoghayn.

3. Guddiga Qaranka ee Biyaha wuxuu bixiyaa ra'yi ku saabsan;
   a) Qorshe horumarinta iyo qaybinta khayraadka biyaha Qaranka;
   b) Mashruucyada isticmaalka khayraadka biyaha, ee danta qaranka.
4. Guddiga Qaranka ee Biyaha wuxuu kulmaa ugu yaraan mar saddexdii biloodba wasiirka Howlaha Guud agtiisa.
5. Guddiga Qaranka ee Biyaha wuxuu awood uu leeyahay inuu dejiyo qodobbada habdhaqanka gudahiisa.

6. Guddiga Qaranka ee Biyaha wuxuu magacaabi karaa guddiga khubaro ah leh shaqo la talin arrimaha awoodiisa xirfadeed; iyo inuu ku casumi karo khuburadaas inay ka soo qeybgalaan isla kulumadaas.

**Qod. 15**

**Waaxda Biyaha**

1. Waaxda Biyaha ee Wasaaradda Howlaha Guud waxay awood u leedahay inay bixiso fasaxyada isticmaalka, oggolaashaha barista, ruqsadaha qodista ceelasha, iyo ruqsadaha gaarka ah ee qod. 5aad.
2. Qaabka iyo shuruudaha bixinta fasaxyadaas, oggolaashooyinka, ruqsadaha iyo oggolaashooyinka gaarka waxaa lagu dejiyaa Xeer-hoosaad si waafaqsan Qod. 20 ee Sharcigan.

**Qod. 16**

**Guddi Goboleedyada Biyaha**

1. Gobol kasta waxaa ka dhisan Guddi Goboleedka Biyaha, ka kooban;
   a) Guddoomiyaha Gobolka – Guddoomiye
   b) Laba sarkaal soo magacaabay Wasiirka Howlaha Guud – Xubin
   c) Hal sarkaal soo magacaabay Wasiirka Beeraha iyo Xanaanada Xoolaha – Xubin
   d) Sarkaal u soo magacaabay Wasiirka Caafimaadka iyo Shaqada – Xubin
   e) Sarkaal uu soo magacaabay Wasiirka Isgaarsiinta – Xubin.
   f) Sarkaal soo magacaabay Wasiirka Maaliyadda – Xubin
   g) Saddex wakiilo ee isticmaalayaasha Gobolka, soo magacaabay Wasiirka Howlaha Guud kaddib soo jeedinta Guddoomiyaha Gobolka – Xubin

2. Marka laga reebo xubnaha ku xusan xarafka ee faqrada kowaad, dhammaan xubnaha kale Guddiga Gobolka ee Biyaha waa in laga soo xulaa Saraakiisha Maamulka Dowladda.
3. Guddiyadda Gobolka ee Biyaha waxay qabanayaan shaqooyinka iyaga Xeer-hoosaadka u xilsaaray eek u xusan Qod. 20 ee sharcigan.

**Qod. 17**

**Ergasho waxqabad Maamul**

Wasiirka Howlaha Guud wuu u wakiilan karaa Guddiga Gobolka ee Biyaha Shaqooyin Maamul gaar ah, u xilsaaran yahay si waafaqsan sharcigan, inta ku siman isla goobtaas.

**Cinwaanka 3aad**

Xeerar kama dambeys Ah

**Qod. 18**

**Isticmaal xadidan ee Komboresorada**

1. Wasiirka wasaaradda Howlaha Guud, dhageystay Guddiga Qaranka ee Biyaha, marka Jilaalka jiro ama sabab kale ee danta guud, shaaca ka qaado degmooyinka gaar ama deegaanno "Kombaresarrada isticmaalka xadidan" lagu soo saarayo dekereeto laga baafiyey faafinta Rasmiga.
2. Sida ku xusan faqrada la soo sheegay, waaxda Biyaha ee Wasaaradda Howlaha Guud wuu ku soo rogi karaa Kombarasooriyada Xadidaad gaar ah dhanka barista, ka soo saarista, isticmaalka iyo qaybinta biyaha.

**Qod. 19**

**Qodobbo Ciqaab**

1. a) Qof kasta isticmala biyo oggolaasho la'aan sida ku qeexan sharcigan waxaa lagu ciqaaba ganaax ilaa sh.so. 3,000 iyo ganaax dheeraad ah sh.so 20 maalin kasta haddii uu sii wado xadgudubka kaddib xaqiijinta.
   b) Isticmaalaha isticmaala biyo xadgudubka ah fasaxyada ama oggolaashaha gaar ahaaneed eek u xusan qodobbada 4 iyo 5 ee xeerkan, waxaa lagu ciqaaba ganaax ilaa sh.so 1,000;
   c) Isticmaalaha sameeya isticmaal xumo iyo khasaarin biyo, waxaa lagu ciqabaaa ganaax ilaa sh.so. 500;
   d) Isticmaalaha wareejiya oggolaasho la'aan ruqsadiisa isticmaalka waxaa lagu ciqaabaa ganaax ilaa sh.so. 2,000;
   e) Qof kasta, oggolaasho la'aan, sameeya baaris ama ku kaca qodis ceelal, waxaa lagu ciqaabaa ganaax ilaa sh. So 5,000;
   f) Qof kasta ka horyimaada xeerarka Qod. 18 (2) ee sharcigan waxaa lagu ciqaaba xarig ilaa lix bilood ama ganaax ilaa sh.so 1,000, ama labada ciqaabba.
2. Malaynta ku xusan xarfaha a), b), e) faqrada hore, Maxkamadda way amri kartaa sidoo kale xaraash makiinadaha iyo qalabka gooni ah (Jihaaz) loo isticmaala jebinta Xeer; iyo iska tuuro, haddii lagama maarmaan tahay, ka dhiga dug xaaladda walxaha, kharashka saran yahay xadgudbaha.

**Qod. 20**

**Xeer-hoosaadyada fulinta**

Wasiirka Howlaha Guud, markuu dhageysto Guddiga Qaranka ee Biyaha, wuxuu soo saari kaara Xeer-hoosaadyo socodsiinta sharcigan.

**Qod. 21**
**Burin Qodobbo**

1. Waxaa la burriyey go'aannada sharci iyo xeer-hoosaadyada soo socda;
   a) D.M. 22 Oktoobeer 1929kii, Qodobbada 18 – 23 isticmaalka biyaha;
   b) D. Gov. 19 Nofember 1933, L. 9900.
   c) D. G. G. 7 Sebtember 1938 L. 1069 iyo D; G; G. 24 Febaraayo 1940 iyo wax ka badelka;
   d) Sharci 16 Juun 1939, L. 1110, isticmaalka biyaha;
   e) Ujuurada iyo marrada Boqortooyadda; Sar. 61 ee 20kii Agoosto 1922;
   f) Jadwalka 12 – Ujuurada Siinta biyaha;
   g) Siinta biyaha Berbera – Wargelin, G.N. 46 ee 1947, III P/581;
   h) Amar L. 10 ee 17 Disember 1958;
   i) Amar L. 11 ee 17 Disember 1958;
   j) Amar 12 ee 17 Disember 1958;

2. Waxaa kaloo la burriyey sharci kasta ee ka soo horjeeda ama la socon Karin kuwa ku xusan sharcigaan.

**Qod. 22**
**Dhaqangal**

Sharcigan wuxuu dhaqangelaa maalinta xigta ku baahintiisa Faafinta Rasmiga ah, waxaana dhexgelinaa Ururinta Rasmiga ah ee Sharciyadda iyo Dekereetooyinka Jamhuuriyadda Soomaaliya.
Qof kasta waa ku khasab dhowraa inuu ilaaliyo iyo inuu faraa in la dhowro sharci Dowlad ahaan.

Muqdishu, 1 Agoosto 1966

Aden Abdulle Osman

*Wasiirka Kowaad*
Abdirizak Hagi Hussein
*Wasiirka Howlaha Guud*
Sheikh Abdulle Mohamed